

Adeegyo Taageero siin

Waxaa jira tiro adeegyo lacag la'aan ah kuwaasoo kaa caawin doona inaad hesho taageero, talobixin iyo wax u qabad si toos ah lagu siiyo si aad gurigaaaga si fiican ugu noolaato. Waxay sidoo kale adeegyadu gacan kaa siin doonaan in lagaala taliyo arimo lacago, dalbasha Cayr, la kulmid saaxiibo, helitaan meelo lagu nasto, la xiriirid dadka xaafada degan, helitaan takhtar qoys, arimo guriyeyn, arimo la xiriira sharci qaxootinimo, tababaro iyo shaqaaleyn, iskool dhigasho, ilmo meel ku hayn iyo adeegyo kale oo xaafadda laga bixiyo.

In kastoo adeegyada ay wakiil ka yihiin baahida qof kasta, hadana, ujeedadu waa in la dhiso isku kalsooni qof ahaaneed iyo in marka ugu danbaysa dadku ay arimahooda maamushaan iyadoo aan taageero ku tiirsanayn. Saraakiisha adeegyadan ka shaqeeya ayaa dadka ku booqda guryahooda, waxay sidoo kale gacan siiyaan dad sugaaya inay kazoo baxaan isbitaal, ayna qabsadaan waxyaalo u sahlaaya inay si sahlan dadku isbitaal uga baxaan oo markaas ay tagaan guryahooda.

Haddii aad rabto adeegyo af celin ama macluumaad lagugu siiyo luuqad kale, diyaar ayaan u nahay inaan gacan ku siino.

Adeegyadan waxaa lagu maalgeliyey Taageerida Dadka waayeelka ah, iyo adeegyo ay bixiyaan haya'ado ku shaqeeya iskaa wax u qabso.

Sida loo helo adeegyo taageero bixin

Qaab telefoon ama warqad ayaad si toos ah haya'adan ugala soo xiriiri karaa amase xannaaneeye bulsho ama aqoonyahan caafimaad ayaa kugu soo xiri kara adeegan. Waxay ku waydiin doonaan magacaaga, ciwaankaaga, taariikhda aad dhalatay, sababo aad wax u codsanayso iyo waxii baahi wax u tarjumid ah.

Halka laga heli karo adeegyo

La siiyo dumar iyo rag jira 60 sano iyo wixii ka wayn:

60+ in Haringey

Block 27F, Units 3/4/5/6

N17 Studios

784-788 High Road

Tottenham N17 0DA

Tel: 0800 652 610

Maalin kasta waan furanahay laga bilaabo 9.00am - 9.00pm.

Dad jira 16-65 sano, dad kaligood nool iyo kuwo isqaba:

Key Support

7 Willoughby Road

London N8 0HR

Tel: 020 8347 2327

Fax: 020 8348 0418

Email: keysupport@communityhousing.org.uk

Adeegan waxuu u furan yahay dad naafo ah waxaana xafiisku furan yahay
Isniin ilaa Jimce 9.00am - 5.00pm.

Adeegyo Qoysas iyo Caruur (For families with children):

HARTS (Haringey Tenancy Support) for Families

1-7 Corsica Street

London N5 1JG

Tel: 0845 303 2350

Fax: 020 8826 1701

Email: harts@circle33.org

Adeegan waxuu u furan yahay dad naafo ah waxaana xafiisku furan yahay
Isniin ilaa Jimce 9.00am - 5.00pm.